Policy Briefing

# Xiisadda Kismaayo:
## Xalku Waa Meel Dhexe

**Xiisadda sii cakirmeysa ee Kismaayo waxay wiiqi kartaa dowladda cusub ee Soomaaliya. Waxay kaloo dalkan soo kabsanaya qarka u saareysaa dagaal sokeeyo. Sidoo kale, waxay xasillooni darro ka keeni kartaa gobolka Geeska Afrika, kala qaybin kartaa koonfurta Somaaliya, waxayna irrid u furi kartaa al-Shabaab inay markale dib u qabsadaan gobolka. Sidaas darteed, waxaa la gudboon dhinacyada oo dhan—Dowladda Federaalka, Dowladda Kenya, kooxda Raas Kaambooni iyo beesha caalamka—inay xal degdeg ah u raadiyaan xiisadda Kismaayo.**

**Tan iyo markii Kismaayo laga qabsaday Al Shabaab bishii Oktober ee sannadkii hore, waxaa jiray loollan ku beegneyd ciddii maamuli laheyd. Dowladda Federaalku waxay dooneysaa inay hannaankeeda yagleelidda gobollada ku fuliso Jubbada Hoose, sida ay u dhistay maamullada Hiiraan iyo Baay. Balse, kooxda Raas Kaambooni ayaa 15-kii May waxay Kismaayo uga dhawaaqday maamulka "Jubbaland", kaas oo fikir ahaan ay ku mideysan yihiin gobollada Jubbada Hoose, Jubbada Dhexe iyo Gedo. Ha yeeshee, Al-Shabaab ayaa wali ka arrimiya Jubbada Dhexe, dowladduna waxay maamul u sameysay Gedo biishii Maarso. Waana sababta ay su'aalo uga taagan yihiin gobolnimada "Jubbaland" ee xilligan.**

**Dhinacyada is haya waxay daliishanayaan Dastuurka Qaybyada ah. Inkastoo mugdiga ku jira Dastuurku uu sii cakirayo xiisadda, haddana dhibaatadu asal ahaan waxay salka ku heysaa loollan siyaasadeed iyo mid dhaqaale. Marka ay labada dhinac garwaaqsadaan sida ay awooddoodu u kooban tahay ayay fududaaneysaa in meel dhexe xalka laga raadiyo. Isu tanaasulku wuxuu suurtagal noqonayaa marka ay dhinacyadu u ruuqaansadaan inay farqiga ku dhex jira ku dhammeeyaan si waafaqsan Dastuurka Qabyada ah, isla markaana ku saleysan in la wadaago awoodda, ilaha dhaqaalaha iyo masuuliyadda qaran.**

**Yididiilada xaqa ah ee shacabka Jubbooyinka waa in la tixgaliyo. Halgankii ay kooxda Raas Kaambooni usoo gashay dib u qabsiga Kismaayo-na waa in la qaddariyo. Sidoo kale, walaaca ay Dowladda Federaalka Soomaaliya ka qabto inaan loo dhammeyn isla markaana uusan hufneyn hannaankii lagu dhisay "Jubbaland" waa in si taxaddar leh loo tixgaliyaa.**

### Raadraac

Maamulka Kismaayo wuxuu ahaa mid lagu muransan yahay tan iyo markii ay dhacday xukuumaddii dhexe sanadkii 1991-kii. Saddex arrimood ayaa gundhig u ah colaadda aan dhamman ee magaalada.

Kow, magaaladu waxay leedahay mid kamid ah dekedaha ugu weyn Soomaaliya. Dekeduhu waa ilaha dhaqaale ee ugu muhiimsan ee dhinacyada Soomaalidu ay waligood-ba ku loollami jireen. Dekeddu waxay soo saarayaa dhaqaalaha loo baahan yahay si loo ballaariyo maamulka gobolka.

Midda labaad, Kismaayo waxay kamid tahay magaalooyinka ay Soomaalida isugu dhafan tahay. In ka badan 30 beelood ayaa dega gobolka, isla markaana kordhiyey loollanka joogtada ah.

Midda saddexaad, Kismaayo waa irridda laga galo dhulka ugu hodansan Soomaaliya. Gobolka Jubbada Hoose oo ay Kismaayo caasimad u tahay waxaa lagu doodi karaa inuu yahay midka ugu qanisan 18-ka gobol ee Soomaaliya. Ma jiro gobol kulansaday dhul-beereed, daaq iyo khayraad badeed oo tiro badan.

Tan iyo 2008-dii, Kismaayo waxay saldhig u aheyd kooxda al-Shabaab, kuwaas oo 40% dakhligooda kasoo saari jiray magaalada. Inkastoo xukunkoodu uu ahaa mid gabood-fal badan, haddana waxay shacabku ku haysteen xasillooni la isku halleyn karo. Balse markii ay malleeshiyada Raas Kaambooni oo kaashanaya 4,000 oo askari oo ciidanka Kenya ah ay la wareegeen, waxaa durbadiiba soo laba kacleeyey loollaankii.

### Siyaasadda

Khilaafka Kismaayo waxaa udub dhexaad u ah xiisad ka taagan "siyaasad la isla oggol yahay" oo ay Soomaaliya yeelato. Kalsooni darrada ka dhex jirta qabaa'ilku waa mid qoto-dheer. Af-ku-dirirka ka dhashay arrinta Kismaayo waa mid si aan caadi aheyn u sumeysan.

Siyaasiyiinta Xamar waxaa lagu eedeeyey inay doonayaan soo nooleynta dowlad awoodda oo dhan caasimadda ka maamusha, taas oo xadgudub ku ah Dastuurka Qabyada ah oo faraya dhismaha maamul-goboleedyo federaal ah. Kalsooni darrada laga qabo dowlad noocaas waxay salka ku haysaa cabsi laga qabo sed-bursi iyo muquunin, iyo cabsidii dagaalka sokeeye.

HIPS

Beelo ayaa doonaya inay xadidaan kaalinta Dowladda Federaalka ee dhismaha maamulka "Jubbaland".

Is-barbar dhig ayaa loo soo qaataa Puntland, oo arrimaheeda maamulata iyadoo aan wax fara-galin ah uga iman Dowladda Federaalka. Dhinacyada Kismaayo ayaa sheeganaya inuu Dastuurku xaq u siinayo inay soo dhistaan "Jubbaland". Waxayna ku doodayaan in hannaanka lagu gaarayo hadafkaas-na uu yahay mid gabi ahaan-ba ka madax bannaan Dowladda Federaalka.

Dhanka kale, dowladda Xamar fadhigeedu yahay ayaa qabta in "Jubbaland" aysan u dhammeystirneyn kaabayaashii sharciga ahaa iyo dhul is haysta oo gobol federaalka kamid noqda laga dhisi karo. Waxay dowladdu soo daliishaneysaa qodob ku jira Dastuurka Qabyada ah oo faraya in dowlddu ay hoggaamiso hannaanka dhismaha maamul-goboleedyada. Dowladdu waxay ku doodeysaa in kaalintii aheyd inay iyadu hoggaamiso maamual u dhisidda Kismaayo si cad loo diiday.

Dowladdu waxay qaadday tallaabooyin ay ku xagal-daacineyso dhismaha "Jubbaland". Bishii Maarso, Ra'iisul Wasaare Cabdi Faarax Shirdoon ayaa u socdaalay Gedo, kana dhisay maamul. Taasi waxay u diidday siyaasiyiinta Kismaayo gobol labaad oo ay dastuuriyan ku khasban yihiin si ay u dhisaan maamul-goboleed.

Dowladda Federaalka iyo urur-goboleedka IGAD waxay walaac ka muujiyeen sida aan loogu dhammeyn, uusanna u hufneyn hannaankii lagu sameeyey "Jubbaland" bishii May. Waxay ku doodeen in beelaha laga tirada badan yahay aan si ku filan loola tashan, isla markaana aysan uga dhex muuqan hannaanka maamul.

Dowladda Federaalku waxay ka cabsi qabtaa in haddii sida loo hindisay uu maamulka "Jubbaland" u hirgalo uu horseedi karo inay si habqan ah ah ay kusoo baxaan maamul-goboleedyo kale. Haddii Dowladda Federaalku ay ku guuleysato inay hoggaamiso hannaanka, gobollada mustaqbalku waxay ku khasbanaan doonaan inay oggolaansho kasoo qaataan inta aysan guda galin hannaan dhismaha maamul-goboleedyada federaalka.

## Dhinacyada is haya

Saddex dhinac ayaa ugu tun weyn qaybaha Kismaayo isku haya: Dowladda Federaalka, ciidanka Kenya oo AMISOM ka tirsan iyo kooxda Raas Kaambooni. Dhammaantood waxay wadaagaan hadafka muddada soke ee ah in gobolka intiisa kale laga soo ceshado al-Shabaab. Balse ahdaaftooda siyaasadeed waa kuwa si muuqda u kala duwan.

Ciidanka iyo dowladda Kenya waxay muddo dheer baadi-goobayeen dhul ay ka ilaashadaan masaalixdooda aasaasiga ah. Si ay hadafkaas u gaaraan, waxay tababarayeen 4,000 oo ciidan Soomaali ah. Kenya waxay hiil iyo hoo-ba siisay kooxda Raas Kaambooni. Labadooda ciidan ayaa isku dhufeys ka dagaallamay.

Hadafka Raas Kaambooni waa mid iska cad waana: ka tali Kismaayo iyo gobollada Jubbooyinka, adigoo Kenya taageero ka helaya. Markii la qabsaday Kismaayo kaddib, hoggaamiayah Raas Kaambooni, Sheekh Axmed Madoobe ayaa isku sallaxay inuu noqdo hoggaamiyaha mustaqbalka ee gobolladaas. Kenayana waa ay u hagar baxday saaxiibkeedan cusub.

Dhinaca saddexaad waa Dowladda Federaalka ee Muqdisho fadhida. Hadafkeedu waa inay awoodda dalka isku dubba ridato, iyadoo maamullo u sameyneysa gobollada. Iyadoo la indha-sarcaadsan aqoonsi caalami ah oo aan hore loo arag ayay dowladdu, mararka qaar, waxay si isla weyni laga dhadhansan karo isaga indha tirtay walaaca dhabta ah ee ay qabaan beelaha Kismaayo qaar. Dowladdu waxay isku dayday inay naqshaddeeda dhisidda gobollada ku fuliso Kismaayo, iyadoo aan tixgalin soo jireenka magaalada. Tallaabadaas way ku laba qaraxday Dowladda, inkastoo ay mowqifkeeda federaalka taageero uga heshay IGAD.

## Fursadaha Tanaasulka

Fursad si qumaati ah xal loogu heli karto arrinta Kismaayo ayaa wali jirta. Isu-tanaasul ayaa looga gudbi karaa caqabadda. Dhinacyada oo dhami tabasho loo garaabi karo ayay qabaan, balse mowqifyadooda sii adkaanaya waa kuwa aan natiijo keeneyn. Waa inay garowsadaan taagtooda kooban, iyo inay is baabi'in karaan. Dhowr tallaabo waa in si degdeg ah loo qaado.

Kow, waa in xiisadda Kismaayo loo aqoonsado arrin dibu heshiin oo u baahan xal siyaasadeed oo si qoto-dheer looga baaraan dagay. Inkastoo ugu dambeynta loo baahan doono dawo dastuuri ah si loo xalliyo mugdiga xagga sharciga ee arrimaha federaalka, haddana waa in siyaasiyiintu ay isku yimaaddaan oo ay baadi-goobaan xal dhexdhexaad ah. Baaqa kasoo yeeray IGAD ee ah shir dibu heshiisiin oo ay Soomaalidu hoggaamiso waa tallaabo sax ah.

Qodobka labaad, Dowladda Federaalku waa inay garowsataa xaaladda dhabta ah ee ka jirta Kismaayo, isla markaana la timaaddo siyaasad bisil oo xaaladdaas ka tarjumeysa. Yididiilooyinka dadka Jubbooyinka iyo halgankii ay Raas Kaambooni usoo gashay in Shabaab laga kiciyo magaalada waa in la tixgaliyo oo la garowsado. Sheekh Axmed Madoobe waa in loo oggolaado inuu hoggaamiyo maamul ku meel gaar ah oo laga dhiso gobolka Jubbada Hoose, iyadoo la tiigsanayo in la yagleelo maamul-goboleed ay ku jiraan gobollada Jubbada Dhexe iyo Gedo. Muddo laba sano gudohood ah, maamulkaas iyo Dowladda Federaalkuna waa inay ka wada shaqeeyaan afar arrin oo muhiim ah:

1. In la ballaariyo dhulka uu maamulku gaaro, magaalooyinka harsan ee Jubbada Hoose-na gacanta Shabaab laga saaro.
2. In dibu heshiisiin dhab ah iyo kasooni dhisid laga abaabulo beelaha walaalaha ee wada daga gobollada Jubbooyinka.
3. In la tayeeyo hey'adaha maamulka ee ka jira Jubbooyinka, iyo in malleeshiyaadka jira lagu daro

Ciidanka Qaranka, lana kordhiyo canshuur uruurinta iyo xoojinta cududda maamulka.

4. In dhidibbada loo aaso hannaan hufan oo loo dhan yahay oo ay beeluhu kusoo xushaan masuuliyiintooda iyo wakiilladii u matali lahaa shirweyne go'aan ka gaara aayaha gobollada Jubbooyinka iyo ciddii hoggaamin laheyd.

Saddex, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa inuu muujiyaa hoggaankiisa xiisaddan taagan. Intii hadda ka horresay, wuxuu ahaa mid maqan, ama mararka qaar kuba dhex jira xiisadda. Maadaama uu yahay hay'adda matasha shacabka, Baarlamaanku waa inuu xilligan xasaasiga ah soo fara-galiyaa arrimaha Jubbooyinka, kana shaqeeyaa sidii Soomaaliya looga badbaadin lahaa inay dib ugu dhacdo ceelkii qalalaasaha iyo fowdada. Guddiga Dibu Heshiisiinta ee Golaha Baarlamaanku waa hey'adda ku habboon inuu ka shaqeeyo daminta xiisadda aloosan. Baarlamaanku waa inuu ansixiyaa Guddiga Federaalka iyo Soohdimaha kaas oo soo hindisa kara siyaasado qaran oo lagu yagleelo maamul-goboleedyo.

Afar, beesha caalamku kaalin muhiim ah ayay ku leedahay inay sahasho isla markaana taageerto xal ay Soomaalidu hor-kacdo. Wakiilka cusub ee gaarka ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Sooomaaliya, Danjire Nicholas Kay, isagoo kaashanaya dhiggiisa Midowga Afrika, Midowga Yurub, Maraykanka iyo Turkiga iyo dalalka kale ee muhiimka, waa inay Soomaalida ku caawiyaan sidii ay u dejin lahaayeen xiisaddan, una fududeyn lahaayeen wada xaajood Soomaaliyeed oo meel-dhex la isugu imaanayo. Beesha caalamku waa inay sii waddaa dadaalkeedii, inta ay Soomaalidu ka dhisanayaan dal dimoqraadi ah oo shaqeeya, dhexdiisa iyo dariskiisa-na nabad kula nool.

Inkastoo uu walaaca xagga amni ee ay Kenya qabto uu yahay mid dhab ah, haddana waa inay garowsataa in siyaasaddeeda ay ku raadineyso gobol ay iyadu ka sameysatay soohdinta Soomaaliya kala dhaxaysa ay tahay mid aan aragti fog ku dhisneyn. Dowlad awood leh oo dimoqraadi ah oo Soomaaliyeed ayaa si hagar bax ah u ilaalin karta maslaxaddeeda. In ka badan 20 sano, shacabka iyo dowladda Kenya waxay si deeqsinimo leh usoo dhaweynayeen boqollaal kun oo qaxooti Soomaali ah. Caasimadda Nairobi-na waxaa marar badan lagu qabtay shirar dibu heshiisiineed. Muddo yar wixii ka horreeyey, Kenya waxay aheyd mid aan faraha lasoo galin amuuraha cakiran ee Soomaalida, balse xawaaraha ay waayadan dambe kusoo gashay waa mid habowsan. Kulankii uu Madaxweyne Uhuru Kenyatta la qaatay madaxweynaha Puntland, C/raxman Faroole, oo hoggaaminayey wafdi ay ku jiraan qaar kamid ah ragga sida weyn ugu ololeeya maamulka Jubbooyinka, waxay Dowladda Federaalku u fasiraneysaa in Nairobi ay taageersan tahay hannaankii "Jubbaland" lagu dhisay. Sidoo kale, go'aanka ay Kenya ku xannibtay wasiirro Soomaaliyeed gegida dayuuradaha ee Kismaayo wuxuu meel-ka-dhac ku yahay shacabka Soomaaliyeed, aragtidey doonaan ha qabeene, wuxuuna xadgudub ku ahaa madax-bannaanida Soomaaliya. Madaxweyne Kenyatta waxaa la gudboon inuu ka shaqeeyo furitaanka baal cusub oo xiriirka labada dal ah, kaas oo ku qotoma is-xushmeyn, wada shaqeyn iyo wada noolaansho.

## Gunaanad

Xiisadda ka aloosan dekedda koonfureed ee Kismaayo waa mid xasillooni darri ka keeni karta Soomaaliya oo dhan haddii aan si qumaati ah loo xallin. Mowqifyada labada dhinac way sii adkaanayaan. Dowladda Federaalku waxay sumcaddeedii siyaasadeed qayb badan oo kamid ah ku lumineysaa inay aariyo bixiso dadaalka maamul loogu dhisayo Jubbooyinka. Kooxda ay Kenya taageerto ee Raas Kaambooni waxay damacsan tahay inay wada tashi la'aan dhisato maamul-goboleed. Ciidanka Kenya waxay sii hurinayaan shakiga, taageerada qayaxan oo ay Ras Kamboni siinayaan awgeed, iyagoo ka xigsanaya dowladda sharciga ah, kuna xadgudbaya howshii loo idmay ee aheyd nabad-ilaalinta.

Xaaladdu waxay u baahan tahay in si degdeg ah loo qaboojiyo. Baaqa IGAD ee ahaa shir nabadeed ay Soomaalidu hoggaamiso waa in la fuliyaa, sababtoo ah khilaafku waa mid siyaasadeed oo aan sharci aheyn. Beesha caalamka, oo ay hoggaaminayaan Qaramada Midoobay, Midowga Africa, Midowga Yurub, Maraykanka iyo Turkiga waa inay ka shaqeeyaan wada xaajood Soomaaliyeed. Dhinacyada is haya waa in lagu cadaadiyaa inay qaataan mabaadi'ida nabadda iyo wadiiqo heshiis oo ku qotonta Dastuurka Qabyada ah.

Sida ugu macquulsan ee lagu heshiin karana waa in la garowsado yididiilada dhabta ah ee shacabka Jubbooyinka, lana tixgaliyo halgankii ay Raas Kaambooni usoo gashay in Al Shabaab Kismaayo laga eryo. Dowladda Federaalku waxaa habboon inay hoggaamiyaha Raas Kaambooni u aqoonsato inuu yahay madaxa maamul ku meel gaar ah oo Jubbada Hoose ka dhisan, muddo aan ka badneyn laba sano, intaas oo la sii adkeynayo tayada hey'adaha gobolka, dibu heshiisiin iyo kalsooni dhisid-na laga shaqeynayo. Tallaabooyinkani waa inay horseedaan hannaan hufan oo loo dhan yahay oo maamul-goboleed federaal lagu soo dhiso.

Inta lagu jiro maamulka ku meel gaarka ah, malleeshiyada Raas Kaambooni waa in lagu daro Ciidanka Qaranka, oo uu horkacayo taliye ay soo magacowday Dowladda Federaalka. Labada dhinac waa inay ka wada shaqeeyaan hannaanka canshuur uruurinta. Ugu dambeyntii, ciidanka Kenya waa inuu ku ekaadaa howshii loo idmaday isla markaana xushmeeyaa madax bannaanida Soomaaliya. Kenya waa inay garowsataa in dowlad Soomaaliyeed oo dimoqraadi ah ay tahay midda kaliya ee si wanaagsan u ilaalin karta daneheeda.

## Talooyin

### Ku socda Dowladda Federaalka:

- U aqoonso xiisadda Kismaayo mid siyaasadeed oo aan lagu xallin karin si dastuuri ah oo kaliya.
- Garowso in naqshaddaada dhismaha gobollada ay tahay mid aan ku habbooneyn Kismaayo iyo Jubbooyinka.
- Qabooji hadallada xanafta leh ee ku beegan Kismaayo isla markaana garowso xuduudda awooddaada gobollada Jubbooyinka.
- Fuli baaqa IGAD ee ah shir dibu heshiisiin ku saabsan Kismaayo, adigoo la kaashanaya beesha caalamka.
- Aqoonso isla markaana abaal-mari yididiilada shacabka Kismaayo iyo halganka ay Raas Kaambooni u hurtay dib u qabsashada Kismaayo, una oggolow hoggaamiyahooda inuu madax ka noqdo maamul ku meel gaar ah oo gobolka Jubbada Hoose laga dhiso, kaas oo ka shaqeeya hannaan hufan oo loo dhan yahay oo shacabku ay ku go'aansadaan aayaha Jubbooyinka.
- Si xooggan ula shaqee dowladda Kenya, kana shaafi walaacooda xagga amniga ah.

### Ku Socda Raas Kaambooni:

- Ka noqo dadaalka halka dhinac ah ee aad ku dooneyso maamul-goboleed adigoo aanan heysan dhulka aad dooneyso inaad maamusho, isla markaana hannaankii aad kusoo dhistay-na uusan aheyn mid loo dhan yahay, hufanna.
- Aqoonso oo kala shaqee Dowladda Federaalka yididiilada shacabka ee xaqa ah ee ku beegan inay maamul-goboleed sharci ah sameystaan.
- Marka hore maamul ka samee Jubbada hoose, inta Jubbada Dhexe laga soo ceshanayo, Gedo-na ay si iskeed ah ugu soo biireyso hannaanka Jubbooyinka.
- Tixgali baaqa IGAD kana qayb qaado shir dibu heshiisiineed oo hadafkiisu yahay in xiisadda lagu xalliyo.

### Ku Socda Dowladda Kenya:

- Dhexdhexaad ka noqo arrinta Kismaayo, isla markaana garowso in dowlad Soomaaliyeed oo dimoqraadi ah ay tahay midda kaliya ee ilaalin karta maslaxadahaaga qaranka.
- Ka shaqee in dhinacyada Kismaayo ay wada hadlaan nabad-na qaataan.
- Kala shaqee beesha caalamka in xal kama dambeys ah loo helo khilaafka Kismaayo.
- Xushmee waajibaadka ku saaran AMISOM ahaan hana isku dayin in aad carqaladayso dhaqdhaqaaqa madaxda federaalka ama aad fara-geliso siyaasadda gudaha ee Soomaaliya.

### Ku Socda Beesha Caalamka:

- Ka shaqee qabsoomidda shir sare oo hadafkiisu yahay in la qaboojiyo hadallada xanafta leh, lana qaato mabda'a dibu heshiisiinta.
- Fududee isla markaana kormeer in dhisidda maamul ku meel gaar ah oo ay dowladda Soomaaliyeed-na taageerto, oo uu madax ka yahay sarkaal sare oo ka tirsan Raas Kaambooni, shaqadiisuna tahay inuu laba sano gudohood ku diyaariyo xulasho xalaal ah, iyo dhismaha maamul-goboleed federaali ah.
- Qabanqaabi taageero siyaasadeed iyo mid dhqaale oo lagu caawinayo maamulka Kismaayo inuu gaaro ahdaaftiisa.

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay. Iyadoo ah xaruntii maskax-maalka ee ugu horreysay Soomaaliya, hadafkeedu waa inay xog iyo saameyn ku yeelato jaan-goynta go'aammada siyaasiga ah, iyadoo u mareysa daraasado cilmi-baaris iyo falanqeyn ku saleysan. Machadku wuxuu kaloo doonayaa inuu ka qayb qaato hana-qaadka iyo hirgalinta dhaqan aqoon iyo cilmi-baaris ku saleynsan.

www.heritageinstitute.org • info@heritageinstitute.org

© MACHADKA HERITAGE EE DARAASAADKA SIYAASADDA, 2013